SOMALIA DIALOGUE PLATFORM
SOMALI PUBLIC AGENDA
DECEMBER 2020

# Xasilloonida iyo Daahfurnaanta Hannaanka Doorashada dadban ee Soomaaliya

SOMALIA DIALOGUE PLATFORM IYO SOMALI PUBLIC AGENDA

## Qodobbo muhiim ah:

- Madaxdaweynaha Dowladda Federaalka iyo Madaxweynayaasha Dowlad-Goboleedyada Soomaaliya ayaa ku heshiiyey in dalka laga qabto doorasho dadban, taasoo kordhinaysa tirada cod-bixiyayaasha iyo metelaadda degaan doorashada dalka. Heshiiskani waa tallaabo muhiim ah oo horay loo qaaday kadib muddo dheer oo xiisado siyaasadeed ee cakiran ay jireen.
- Nooca doorashada ayaa dhinacyo badan kala mid ah doorashadii 2016. Ergooyin doorasho oo ku saleysan beelo kana kooban 101 ergo ayaa u codeyn doona kursi kasta oo kamid ah Golaha Shacabka, halka kuraasta Aqalka Sare ay u codeyn doonaan goleyaasha dowlad-goboleedyada. Codbixinta ayaa ka dhici doonta kow iyo toban goobood oo dalka ah waxaana maamuli doona guddiyada doorashooyinka heer federaal iyo heer dowlad goboleed.
- Waxaa jira arrimo siyaasadeed oo dhowr ah oo aan weli la xallin sida: Ku kala aragti duwanaanta kalsoonida lagu qabi karo guddiyada maaraynta doorashada, cidda leh msuuliyadda qabashada doorashada Gobolka Gedo, iyo nidaamka lagu maareenayo doorashada kuraasta Soomaaliland, arrimahan ayaa carqaladeyn kara hannaanka doorashada. Waxa kale oo jirta khatar ah in wakhtigu ka dheeraado wakhtiga dastuuriga ah ee u mudeysan doorashada, laguna kala aragti duwaanado, ayna ka dhalan karaan xiisado dhaliya rabshado.
- Nooca doorashada ee la isku raacay ayaan weli damaanad qaadaynin in geeddi-socodka doorashada uu kordhin doono ka qeybgal loo dhanyahay. Khidmadaha badan ee loo qoondeeyay diiwaangelinta musharrixiinta iyo qoondada haweenka oo aan si gaar ah loo cayimin ayaa wiiqi kara horumaradii dalku hore u gaaray. Dhaqanka iibsashada codadka sidoo kale waxay u egtahay inuu sii jiri doono, baaxadda iibsiga codadkana waxay sii dhaawici kartaa kalsoonida iyo ka qeybgalka loo dhanyahay ee geeddi-socodka doorashada.
- Arrimahan waxaa wax looga qaban karaa iyadoo dib loosoo nooleeyo wada-hadalladii iyo iskaashigii horseeday heshiisyo bishii Sebteembar. Kulamo bille ah ee u dhexeeya hoggaanka Dowladda Federaalka, Dowlad Goboleedyada, tartamayaasha madaxweynaha iyo hoggaamiyeyaasha bulshada rayidka ayaa noqon kara hab lagu xalliyo khilaafaadka.
- Waxaa loo baahanyahay tanaasul ku saabsan arrimaha siyaasadda. Waxaa habboon in dib loogu noqdo xubinnimada hay'adaha maamulka doorashada si loo hubiyo inay waafaqsan yihiin shuruudihii horey loogu heshiiyay. Mucaaradka iyo bulshada rayidka haddii laga talo-geliyo xulashada xubnaha guddiga waxay wanaajin kartaa kalsoonida lagu qabo hannaanka doorashada. Wadahadal gaar ah ayaa looga baahanyahay kuraasta lagu metelo Soomaaliland. Tanaasul ku saabsan qoondaynta kuraasta ee Gedo ayaa sidoo kale loo baahan yahay taasoo dheelitireysa danaha dowladda federaalka iyo tan Jubaland.
- Ka qeybgalka iyo daahfurnaanta geeddi-socodka waxaa lagu xoojin karaa dhowr tallaabo. Ka qeybgalka doorashada ee haweenka iyo dhalinyarada waxaa lagu kordhin karaa iyadoo la dhimo khidmadaha musharixiinta islamarkaana loo qoondeeyo kuraas gaar ah haweenka, gaar ahaan haddii ay ololayn dhiiran sameeyaan bulshada rayidka Soomaaliyeed oo kaashanaya odayaasha iyo hoggaamiyeyaasha siyaasadeed. Daahfurnaan iyo isla xisaabtan ayaa sidoo kale lasii horumarin karaa haddii bulshada rayidka ay door ku yeeshaan kormeerka iyo la-socoshada howlaha doora shada.

## Hordhac:

17-kii Sebteembar, hoggaanka Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada xubnaha ka ah Dowladda Federaalka waxay ku heshiiyeen qaab doorasho dadban oo loogu talagalay doorashooyinka soo socda ee dalka. Iyadoo laga ambaqaadayo doodo taxane ah oo Dhuusamareeb ka qabsoomay bilaha Luulyo iyo Ogosto, nooca doorashadan ayuu baarlamaanku ansixiyay waxaana lagu faahfaahiyay heshiisyadii xigay ee 2-dii Oktoobar.

Inkastoo heshiisku muujiyay in hoggaamiyeyaasha Soomaalidu ay gaareen is-faham aad loogu baahnaa kuna saabsan qaabeynta doorashada, haddana waxaa jira dulduleello badan iyo mugdi jira oo haddii aan wax laga qaban khatar gelinaya daahfurnaanta iyo in loo dhanyahay geeddi-socodka doorashada. Waxa kale oo jira arrimo siyaasadeed oo muran badan dhaliya oo haddii aan la xallin ay sidoo kale kordhin karaan halista isku dhacyada dhalan kara bilaha soo socda.

Warbixintan kooban waxay bixinaysaa muuqaalka guud ee nooca doorashada lagu heshiiyey, oo ay ku jiraan arrimo siyaasadeed oo la isku haysto, iyo khataraha halista ku ah daah-furnaanta iyo wadajirka geeddi-socodka, iyo waliba talooyin ku aaddan sida wax looga qaban karo labadaba. Waxaa loogu talagalay in lagu taageero Soomaalida inay isugu yimaadaan wadahadal ku saabsan geeddi-socodka doorashada, iyadoo ujeedadu tahay kordhinta kamid ahaanshaheeda iyo kalsoonideeda. Arrimaha halkaan lagu qeexay waxaa sida ugu wanaagsan loogu maareyn karaa hadii si joogta ah looga wada hadlo iyadoo la sameynayo wadahadal heer-sare ah, oo ay ku jiraan hoggaanta dowlada federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah, hogaamiyeyaasha mucaaradka iyo bulshada rayidka ah.

## Nooca doorashada ee Soomaaliya – 2020/2021:

Qaabka cusub ee doorashada ayaa ah nidaam doorasho oo aan toos ahayn, taasoo macnaheedu yahay in ergo loo adeegsan doono xulashada wakiillada Golaha Shacabka, halka kuraasta Aqalka Sare ay u codeyn doonaan golayaasha baarlamaanka dowlad-goboleedyada. Doorashada waxaa maamuli doona guddiyo heer federaal iyo heer dowlad goboleed ah iyadoo, sida ku xusan jadwalka, lasoo gebagabeyn doono horaanta Febraayo 2021.

## Doorashooyinka Golaha Shacabka:

Ergooyin doorasho oo ka kooban 101 ergo ah ayaa u codeyn doono mid kasta oo kamid ah 275-ta kursi ee Golaha Shacabka. Tani waxay ka dhigan tahay labalaab ka-qeybgalayaasha marka la barbar dhigo geeddi-socodkii 2016-17. Labaatan-kun, toddobo boqol iyo toddobaatan iyo shan qofood ayaa hadda si toos ah uga qeyb qaadan doona doorashada xildhibaannada qaranka. Ergada waxay ka imaan doonaan beesha (ama jufada) kursiga loo qoondeeyay ee baarlamaanka iyadoo ugu yaraan boqolkiiba 30 ay noqonayaan haween. Sida ergooyinka loosoo xulayo weli lama xaqiijin. Heshiiskii Dhuusamareeb 3 wuxuu qeexayay in odayaal-dhaqameedyo, wakiilo ka socda bulshada rayidka ah iyo dowlad-goboleedyada ay soo xulayaan ergooyinka, laakiin arrinkan laguma caddeyn heshiisyadii dambe.

*Asteynta kuraasta:*

Kursi kasta oo kamid ah Golaha Shacabka waxaa loo qoondeyn doonaa hal goob doorasho – cod-bixintu waxay ka dhici doontaa labo goobood oo ku yaal Dowlad Goboleed kasta, iyo sidoo kale Muqdisho. Tani waa horumar muuqda oo lagu sameeyay hanaankii 2016, markaasoo ay cod-bixintu ka dhacday keliya caasimadaha dowlad goboleedyada iyo Muqdisho. Kursi waliba waxaa loo qoondeyn doonaa beel gaar ah iyadoo lagu saleynayo nidaamka 4.5. Qeybinta kuraasta guud ee beelaha ee Golaha Shacabka waxaa laga filayaa inuu ahaado qaabkii 2016-kii oo kale laakiin waxay u badan tahay inuu isbeddel ku yimaado wax-qeybsiga beelaha ee heerarka hoose iyadoo lagu jaangoynayo wadahadallada odayaasha.

*Musharraxnimada kuraasta baarlamaanka:*

Musharraxiinta waxay u baahan doonaan inay la jaanqaadaan shuruudaha qaarkood, oo ay kamid yihiin inay ka weyn yihiin 25 sano, ay leeyihiin waxbarasho dugsi sare, iyo in aanay kamid ahayn kooxaha argagixisada ah. Musharraxiinta kuraasta Golaha Shacabka waxay bixin doonaan $10,000 oo Doolar si ay isu diiwaangeliyaan. Musharraxiinta ayaan ku xirnaan doonin xisbiyada siyaasadeed, kuwaasoo aan kaalin rasmi ah ku lahayn doorashada.

Jaantus 1: Asteynta kuraasta iyo goobaha codbixinta ee Golaha Shacabka

| Dowlad goboleed/ deegaan doorashada | Goobta doorashada | Tirada kuraasta | Wadarta Dowlad goboleedka/deegaan doorashada |
|---|---|---|---|
| **Galmudug** | Dhuusamareeb | 26 | 37 |
| | Gaalkacyo | 11 | |
| **Hir-Shabeelle** | Jowhar | 13 | 38 |
| | Beledweyne | 25 | |
| **Jubaland** | Kismayo | 27 | 43 |
| | Garbahaareey | 16 | |
| **Puntland** | Garoowe | 21 | 37 |
| | Boosaaso | 16 | |
| **Koonfur Galbeed** | Baydhabo | 43 | 69 |
| | Baraawe | 26 | |
| **Soomaaliland** | Muqdisho | 46 | 46 |
| **Benaadiri** | Muqdisho | 5 | 5 |

*Doorashooyinka Aqalka Sare:*

Goleyaasha baarlamaanka ee dowlad-goboleedyada ayaa u codeyn doona kuraasta Aqalka Sare, kuwaasoo xubnaha ay soo jeedin doonaan madaxda dowlad-goboleedyada. Musharraxiinta waa inay bixiyaan $20,000 oo Doolar si ay ugu tartamaan kuraasta. Inkastoo aan si cad loo sheegin, haddana waxaa la fahamsan yahay in qoondeynta kuraasta dowlad-goboleedyada ee Aqalk Sare ay sidii hore ahaan doonto. Wakiillada Soomaaliland waxaa dooran doona koox ergooyin beeleed ah, inkastoo aan weli la caddeyn sida ay u shaqeyn doonto, iyo cidda soo magacaabi doonto musharraxiinta.

*Maamulka Doorashada:*

Doorashada waxaa lagu maareyn doonaa nidaam heer federaal iyo heer dowlad-goboleedyada ah. 25 xubnood oo kamid ah guddiga hirgelinta doorashada federaalka ayaa kormeeri doona iskuna dubaridi doona howlaha guud ee doorashooyinka. Waxay diyaarin doonaan oo maamuli doonaan miisaaniyadda doorashada, maareyn doonaan jadwalka, waxayna ku dhawaaqi doonaan natiijooyinka. 13 kamid ah xubnaha guddiga heer federaal waxaa magacaabi doona dowladda federaalka halka 12 xubnood ay magacaabi doonaan dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka.

Guddiyada Hirgelinta Doorashada Heer Dowlad-goboleed ayaa mas'uul ka noqon doona fulinta tooska ah ee geeddi-socodka doorashada, oo ay ku jiraan hubinta liisaska wufuudda iyo maareynta codeynta kuraasta Aqalka Hoose. Guddi kasta wuxuu ka koobnaan doonaa 11 xubnood, oo 3 kamid ah ay magacaabi doonaan

Dowladda Federaalka Soomaaliya halka 8-da soo hartayna ay magacaabi doonaan dowlad-golboleed kasta. Guddi gaar ah oo doorashooyinka ah, oo ay magacaabeyso dowladda federaalka oo kaashaneysa siyaasiyiinta iyo odayaasha kasoo jeeda Soomaaliland, ayaa maareyn doona doorashada xildhibaannada metelaya Soomaaliland. Dhammaan guddiyadu waa inay u hoggaansamaan qoondada haweenka ee 30 boqolkiiba shakhsiyaadka la xulayana waa inay buuxiyaan shuruudo adag, oo ay kamid tahay uusan heynin xilal kale oo siyaasadeed.

*Xalinta khilaafaadka:*

Guddiga Xallinta Khilaafaadka oo ka kooban 21 xubnood ayaa maareyn doona cabashooyinka la xiriira xulista ergooyinka, habka codeynta, iyo hab-dhaqanka guddiyada maareynaya doorashada. Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay magacaabeysaa 9 xubnood, halka dowladaha xubnaha ka ah ay magacaabi doonaan 12 xubnood (2 xubnood dowlad-goboleed kasta). Guddigu wuxuu xafiisyo ku yeelan doonaa goob kasta oo doorasho ka dhaceyso iyo xarun uu ku yeelanayo magaalada Muqdisho. Khidmadda diiwaangelinta cabadshada 3,000 oo doolar ayaa la bixin doonaa, guddiga ayaana go'aan ka gaaraya kiiska toddobo maalmood gudahood. Gudiga waxaa kormeeraya Golaha Wadatashiga Qaran.

*Jadwalka:*

Hawsha doorashada waxaa si rasmi ah loo qorsheeyay in lasoo gebagabeeyo 8-da Febraayo 2021 ee uu wakhtiga madaxweynaha ee hadda uu ku egyahay. Waxyaabaha muhiimka ah ee jadwalka lagu heshiiyey waxaa kamid ah: magacaabistar iyo tababarada guddiyada doorashada dhammaadka bisha Oktoobar (inkastoo wakhtigan loo qabtay la dhaafay); doorashada Aqalka Sare iyo Golaha Shacabka kahor 27-ka Diseembar (dhammaadka muddada baarlamaanka); ugu dambayntiina, doorashadii hoggaanka baarlamaanka iyo madaxweynaha ayaa la jadwaleeyay in ay dhacdo bisha Janaayo iyo horraanta Febraayo.

## Arrimaha siyaasadeed ee la-isku khilaafsan yahay:

Inkastoo laga gaabiyey in la gaaro doorasho qof iyo cod ah, heshiiska ku saabsan geeddi-socodka doorashooyinka dadban, kaasoo kordhin doona tirada ka-qeybgalayaasha doorashada hoggaanka qaranka iyo ballaarinta baaxadda juqraafi ahaaneed ee geeddi-socodka doorashada, ayaa ah tallaabo yar, laakiin muhiim u ah ajendaha doorashooyinka iyo dimuqraadiyeynta Soomaaliya. Waxaa jira dhowr meelood oo looga baahan yahay wadahadal siyaasadeed oo deg deg ah si loo hubiyo in uu hannaanku yahay mid lagu kalsoonaan karo halista isku dhacyadana la yareeyo.

*Dhameystirka asteynta kuraasta*

Inkastoo goobaha doorashada si rasmi ah loogu heshiiyey, haddana waxaa jira khilaafyo siyaasadeed oo wiiqi kara fulinta heshiisyadan. Tani waxay si cad uga muuqataa Jubaland, halkaasoo maamulka dowlad-goboleedku ku doodeen in doorasho aysan ka dhici karin magaalada Garbahaarey ee xarunta gobolka Gedo, maxaa yeelay gobolka waxaa gacanta ku haya xoogag la safan dowladda federaalka. Taa beddelkeeda, madaxda Jubaland waxay ku baaqeen in kuraasta loo wareejiyo degmada Ceel Waaq (oo ah degmada keliya ee Gedo ka tirsan oo ay gacanta ku hayaan ciidamada Jubaland) ama Kismaayo. Arrintan ayaa timid xilli ay taagan tahay is-maandhaaf dhanka amniga ah oo u dhexeeya Jubaland iyo dowladda federaalka oo ku saabsan gacan ku haynta gobolka Gedo waxayna u badan tahay inuu dib-u-dhac ku keeno hannaanka doorashada. Waxaa sidoo kale jira walaac laga qabo in degmada Baraawe, oo ah caasimada Dowlad-goboleedka Koonfur Galbeed, amaankeeda aanan layskuu halleyn karin sababo la xiriira al-Shabaab oo jooga hareeraha degmadaas.

Wadahadal loo dhan yahay oo ka bilowda dowlad-goboleedyada dhexdooda ayaa muhiim u ah xaqiijinta heshiiska goobaha doorashada. Tani waxay si gaar ahaan ah u khuseysaa arrinta asteynta kuraasta ee gobolka Gedo, taasoo u baahan doonta wadahadal dhexmara dowladda federaalka, Jubaland iyo wakiilo ka socda gobolka. Hal tanaasul oo suurtagal ah ayaa noqon karta in kuraasta aanay Mareexaan lahayn ee Gedo hadda

la qorsheeyay in lagu doorto loo wareejiyo degmada Ceel Waaq, halka inta kalena ay ku harsanaanayaan Garbahaarey. Tani waxay ka dhigan tahay in kuraasta ay loo kala qeybiyey deegaannada ay Dowladda Federaalka iyo Jubaland saameynta ku leeyihiin.

### *Xaqiijinta hannaan wax-ku-ool ah ee maareynta doorashada*

Xulitaanka guddiyada maaraynta doorashada ayaa durba noqotay mid muran xoogani ka taagan yahay. Walaac xooggan ayaa laga muujiyay in hoggaanka dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyaduba ay raadinayaan inay guddiyada u sameystaan si iyaga u daneyneysa, iyo in xubno badan oo guddiyada kamid ah aysan si ku filan ugu qalmin xubinnimada guddiyada. Taageerada siyaasadeed ee kala duwan ee xubnaha guddiga, oo mid kastaa ka koobnaan doono isku darka wakiilada dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada, ayaa sidoo kale caqabad ku noqon kara shaqadooda.

Si maareynta doorashadu u noqoto mid wax-ku-ool ah, waa in lagu saleeyaa mabaadii'da dhexdhexaadnimada iyo in loo dhan yahay waana in taxaddar la muujiyaa si loo muujiyo inay taasi jirto. Hal dariiq oo tan lagu sameyn karo waa iyadoo la hubiyo in guddiyada ay u hoggaansamaan shuruudaha xubinnimada ee lagu dhisay heshiiskii habraacyada doorashada ee 2-dii Oktoobar, oo ay ku jiraan qoondada haweenka ee 30 boqolkiiba iyo in xubnuhu aysan ahayn shaqaale dowladeed ama aysan heynin jago kale oo siyaasadeed. In bulshada rayidka ah iyo dhammaan tartamayaasha madaxweynaha la siiyo kaalintooda marka la xulayo xubnaha guddiyada sidoo kale way fiican tahay. Guddiyadu waa inay sidoo kale sameeyaan wacyigelin joogto ah si ay u faafiyaan go'aannada iyo habraacyada, oo ay ku jiri karto dhageysiga iyo ka jawaab-celinta dhammaan tabashooyinka jira.

### *Maareynta doorashooyinka kuraasta Soomaaliland:*

Magacaabista hey'adaha maareynta doorashooyinka ee kormeeri doona doorashada wakiilada kuraasta baarlamaanka ee metelaya Soomaaliland waa arrin muran ka taagan yahay. Dadka kasoo jeeda Soomaaliland ee ka tirsan xukuumadda federaalka ayaa xilligan khilaaf kula jira kuwa aan ka tirsaneyn xukuumadda, oo uu hoggaaminayo Guddoomiyaha Aqalka Sare ee arrimaha ku saabsan guddiyada maareynta doorashada ee kuraastaas. Haddii aan xal loo helin, khilaafkani wuxuu khatar ku yahay sharcinimada 57 kursi ee Soomaaliland ku leeyihiin labada aqal ee baarlamaanka. Arrin kale oo la xiriirta kuraasta Soomaaliland ayaa ah habka magacaabista iyo u codeynta wakiillada Aqalka Sare ee Soomaaliland ayaanan lagu qeexin heshiisyada doorashada, taasoo ka dhigeysa mid aan la hubin sida ay taasi u dhici doonto waxa ayna u nugushahay wax is daba marin.

Wadahadalka u dhexeeya saamileyda Soomaaliland ee Muqdisho joogta ayaa loo baahan yahay si xal loogu helo dhibaatada. Hal waddo oo suuragal ah waxay noqon kartaa in siyaasiyiinta mucaaradka ama hoggaanka Aqalka Sare ay magacaabaan xubno cayiman oo katirsan xubnaha maamulaaya doorashada. Doorashada kuraasta Soomaaliland ayaa sidoo kale lagu qaban karaa Xalane, taasoo loo arko inay tahay meel dhexdhexaad ah. Doorashooyinka Aqalka Sare, odayaasha beelaha ama guddi loo dhan yahay oo reer Soomaaliland ah oo ay soo dhiseen odayaal dhaqameed ayaa soo magacaabi kara musharraxiinta kursi kasta.

### *Dhiirrigelinta nidaam hufan oo lagu xalliyo khilaafaadka:*

Suurtagalnimada in natiijada la isku khilaafo inta lagu jiro doorashada waa mid aad u sarreysa, taasoo macnaheedu yahay in helitaanka qaab lagu kalsoonaan karo oo lagu xalliyo dhammaan cabashooyinka la qabo uu muhiim yahay. Sikastaba ha noqotee, 2016 nidaamka xallinta khilaafaadka waxaa loo jeediyay dhaleeceyn badan sababtoo ah waxa uu ku guuldareystay inuu ka shaqeeyo cabashooyin badan iyo u nuglaanta faragelin siyaasadeed.

Guddiga xallinta khilaafaadka waxaa laga yaabaa inuu la kulmo caqabadihii uu wajahay guddigii xallinta khilaafaadka ee 2016. Haddii guddiga uu fulin waayo go'aan, habraaca doorashooyinka eelagu heshiiyey wuxuu awoodda ugu dambeyso siinayaa Golaha Wadatashiga Qaranka si loo xalliyo khilaafaadka taagan (Madasha Hoggaanka Qaranka ayaa doorkan ciyaartay 2016). Sikastaba ha noqotee, Golaha Wadatashiga

Qaran waa kala qeybsan yahay, taasoo macnaheedu yahay in ay u badan tahay in aysan awood badan u lahayn in ay xalliyaan khilaafaadka muhiimka ah.

Xal-u-helidda arrinkan, oo aakhirka astaan u ah tabar-darrada hay'adeed ee Soomaaliya, ma ahan mid toos ah. Sikastaba ha noqotee, dhisidda awoodda Guddiga Xallinta Khilaafaadka kahor doorashada, gaar ahaan sameynta hannaan hufan oo looga baaraandego cabashooyinka, waxay noqon kartaa bilow fiican. Si loo xoojiyo awooddooda xukun, saaxiibada caalamka ee Soomaaliya, iyo sidoo kale siyaasiyiinta Soomaalida laftooda, waa inay horey u sii ambaqaadaan aqbalaadda go'aannada guddigan hadii khilaaf yimaado.

Tan ugu muhiimsan, hoggaamiyeyaasha Soomaalida, oo ay ku jiraan hoggaamiyeyaasha dowladda federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah, iyo weliba kuwa u tartamaya madaxtinimada, waa inay lahaadaan wada hadal dhow inta howsha doorashada socoto. Tan waxaa lagu gaari karaa shirar joogtada ah ee bil kasta ee Madasha Wadatashiga Qaran (oo ay qeyb ka yihiin u tartamayaasha xilka madaxweynaha iyo bulshada rayidka ah). Tallaabooyinkani waxay gacan ka geysan karaan aasaaska kalsoonida iyo iskaashiga kaasoo khilaafaadka si wax-ku-ool ah oo nabad ah loogu maareyn karo.

### *Xaqiijinta jadwal doorasho oo suurto gal ah:*

Jadwalka doorashada ee hadda jira wuxuu sheegayaa in howlaha doorashada la dhameystiri doono horraanta bisha Febraayo. Waa jadwal ay hirgelintiisu adagtahay haddii aanan muddo kordhin farsamo la sameeynin. Waxaa jira howlo fara badan oo isku murugsan oo aan weli la qeexin welina aan la fulin. Wakhtiga loo qorsheeyay magacaabista guddiyada hirgelinta doorashooyinka heer federaal iyo heer dowlad goboleed iyo guddiga xallinta khilaafaadka ayaaba durba si weyn dib-u-dhac ku yimid, taasoo ka dhigan in wakhtiyadii lagu heshiiyey aysan sii socon karin. Sidoo kale, caqabado xagga farsamada ah, khilaafaadka siyaasadeed iyo khataraha amniga ayaa laga yaabaa inay kasoo ifbaxaan habsami u socodka fulinta, taasoo waliba sababi karta dib-u-dhacyo kale.

Dib-u-eegista jadwalka doorashada iyadoo lagu saleynayo dib-u-dhaca illaa iyo hadda ku yimid, iyo dejinta qorshe faahfaahsan waxay yareyn doontaa hubin la'aanta iyo xiisadaha siyaasadeed, waxayna keeni doontaa geedi-socod doorasho oo farsamo ahaan aad u adag. Dib-u-dhac kasta oo dhici kara, iyo sababaha keeni karta, waa in si cad looga wada hadlaa ugana heshiiyaan dhammaan daneeyayaasha. Ugu dambeyntiina, haddii howlaha doorashada aan la dhameystirin kahor inta uusan dhammaan muddo-xileedka baarlamaanka iyo madaxweynaha, waxaa loo baahan doonaa in heshiis cad laga gaaro xaaladda xigta.

## Ilaalinta wadajirka iyo hufnaanta:

Waa in si gaar ah isha loogu hayaa dhowr arrimood oo muhiim ah si ay gacan uga geysato ilaalinta ka-mid ahaanshaha iyo hufnaanta geeddi-socodka doorashooyinka. Sidoo kale yareynta khatarta isku-dhaca iyo xoojinta kalsoonida geedi-socodka doorashada, wax-ka-qabashada arrimahan waxay xaqiijin karaan in tiro badan oo muwaadiniinta Soomaaliyeed ah ay ka qeyb qaataan doorashooyinka loona doorto kuraasta baarlamaanka.

### *Maalgelinta Doorashada:*

Maalgelinta howlaha doorashada weli ma cadda oo waxay u baahan tahay in xal loo helo. Haddii qorshuhu yahay in kharashkii 2016 mid la mid ah la isticmaalo, markaa, tirada ergooyinka iyo goobaha codaynta deegaan ayaa kordhay, qiyaasta ayaana ah inay ku kacayso 40 milyan oo doolar hirgelinta doorashada, marka la barbar dhigo 2016 oo USD 20 milyan ay ku baxday. Qiimaha doorashada waa la dhimi karaa haddii kharashyada qaarkood aan la bixinin, sida gaadiidka codeeyasha, hoygooda iyo cuntada ergada.

Dowladdu waxay ku yaboohday 7 milyan oo doollar oo markii hore loo qoondeeyay doorasho qof iyo cod ah ee lagu daray miisaaniyadda qaranka, taasoo loo adeegsan karo doorashada soo socota. Kordhinta lacagta diiwaangelinta marka la barbardhigo 2016, lacagta lagasoo ururinayo musharraxiinta waxay dhaqaale weyn

ku kordhin doontaa doorashada. Iyadoo lagu saleynayo qiyaasaha ah in ugu yaraan saddex musharrax ay ku tartami doonaan mid kasta oo kamid ah 275-ka kursi ee Golaha Shacabka, iyo laba musharrax oo mid kasta oo kamid ah kuraasta Aqalka Sare, khidmadaha musharraxiinta waxay u badan tahay inay dabooli doonaan ugu yaraan USD 10 milyan oo ah maalgelinta doorashada qeyb ahaan haddii kharashyada ergada aan la daboolin ama la dhimo.

Isbeddelka muhiimka ah ee go'aamin doona xaddiga maaliyadeed ee doorashada ee la heli karo waa taageerada beesha caalamka. Tan waa in la caddeeyaa kahor inta aan la dhameystirin hannaanka doorashada. Tani waxay si gaar ah muhiim u tahay maadaama heerka maalgelintu ay u egtahay inuu qaabeyn doono dhaqdhaqaaqa cod-iibsiga (eeg hoos).

### *Laaluushka/ Musuq maasuqa:*

Cabashada ugu badan oo ay Soomaalida ka muujiyeen geeddi-socodkii doorashadii 2016 waa in natiijada doorashada ay si toos ah saameyn ugu lahaayeen musuqa iyo cod iibsiga. Taas mid la mid ah inay dhacdana cabsi weyn ayaa laga qabaa. Lacagta waxaa loo isticmaalaa in lagu saameeyo howlaha doorashada saddex dariiqo:

1. Musharraxiinta, ergooyinka qaar, ama siyaasiyiinta kale waxay saameyn ku leeyihiin xulitaanka ergooyinka iyagoo laaluush siinaya kuwa diyaarinaya liisaska ergooyinka.
2. Musharraxiinta waxay codadka ka iibsadaan ergooyinka (marka ay tahay doorashada madaxweynaha, musharraxiinta madaxweynaha ayaa codadka ka iibsada xildhibaannada).
3. Musharraxiinta waxay saameyn ku yeelan karaan hay'adaha maamulayaa doorashada iyagoo laaluushaya.

Mid kamid ah waxyaabaha ugu waaweyn ee kordhiyay iibsashada codadka ee 2016 ayaa ahayd in aanan lacag loo qoondeyn daboolista kharashka gaadiidka iyo hooyga loogu talagalay ergooyinka, taasoo ahayd inay bixiso dowladda iyadoo la adeegsanayo khidmadaha musharraxiinta. Tani waxay albaabka u furtay musharixiinta inay saameyn ku yeeshaan codeynta ergooyinka iyagoo adeegsanaya lacagtooda si ay uga daboolaan raashiinka iyo gaadiidka ergada. Isla dhaqdhaqaaqaas ayaa u muuqda inuu kasoo muuqan doono doorashooyinka 2020-21 haddii lacagahaas aan markale la daboolin.

Inta badan ergada doorashooyinka waxay filayaan oo ay u badan tahay inay helaan lacag si ay ugu codeeyaan musharraxiinta. Mudane ka tirsan baarlamaanka federaalka Soomaaliya ayaa ku qiyaasey in musharrax kasta uu u baahan doono ugu yaraan USD 200,000 si uu ugu guuleysto tartanka. Kuwo badan ayaa dhaqaale ka raadin doona musharraxiinta u taagan xilka madaxweynenimo si ay ugu helaan codkooda. Doodda ah in kororka tirada ergooyinka ay yareyneyso xadka iibsashada codadka waxa ay u badan tahay in aanay sax ahayn — kordhinta tirada cod-bixiyeyaasha waxa ay keliya kordhin doonta tirada dadka ay musharixiinta lacagaha siinayaan.

inkastoo cod iibsiga uu noqon doono qeyb kamid ah doorashadan, waxaa jiri kara qaabab lagu yareyn karo cod iibsiga. Marka hore, in lagu daro kormeerayaal bulshada rayidka ah soo xulista ergada waxay yareyn kartaa laaluushka lagu bixiyo diyaarinta liiska ergada. Waxa kale oo laga yaabaa inay waxtar u leedahay jilayaasha kala duwan (hoggaanka qaranka, haweenka iyo bulshada rayidka ah) inay la xiriiraan odayaasha si loogu dhiirrigeliyo inay u arkaan sida danaha qabiilka ay si fiican ugu adeegi karaan xulashada xildhibaanno karti leh oo meteli kara danahooda, halkii ay ka ahaan lahayd in codka la siiyo qofka ugu lacagta badan.

Midda labaad, daboolidda kharashka hoyga ergooyinka iyo quutul-daruuriga ayaa yareyn kara baaxadda cod-iibsiga, maaddaama musharraxiinta aan looga baahneyn inay daboolaan kharashyadan oo qeyb muhiim ah ka ah hannaanka codeynta. Maalgelin caalamiga ah ayaa looga baahan doonaa inay daboosho kharashyadan islamarkaana dhinac saddexaad la keeni karo – sidii ay IOM ahayd 2016 – si sare loogu qaado daahfurnaanta doorashada.

Midda saddexaad, musharraxiinta iyo saamileyda kale ee doorashada waxay ballan-qaadi karaan hufnaan iyo isla-xisaabtan ku saabsan geeddi-socodka. Guddi gaar ah oo ka shaqeeya la-dagaallanka musuqmaasuqa ee doorashada dadban ayaa la dhisi karaa si ay ula xisaabtamaan musharraxiinta kuna cadaadiyaan in musharraxiinta ay fuliyaan ballanqaadyaddooda, soona bandhigaan caddeymaha la xiriira cod iibsiga. Guddigan wuxuu sidoo kale sameyn karaa baaritaan buuxa doorashada kadib iyadoo ujeedadu tahay in sare loo qaado daahfurnaanta.

### *Yareynta Caqabadda dhaqaalka qeybgalka Doorashada:*

Kharashaadka ka qeybgalka ee doorashada waa kuwo aad u sarreeya. Labalaabidda lacagaha aan la celineynin ee isdiiwaangelinta doorashada ee labada aqal waxay xaddideysaa oo meesha ka saareysaa musharraxiinta qaar gaar ahaan dhallinyarada iyo dumarka kuwaasoo ay u badan tahay in aysan awoodin in ay iska bixiyaan khidmadaha isdiiwaangelinta. Kharashaadka sarreeya ee la xiriira u tartamidda kuraasta ayaa sidoo kale dhiirrigelineysa iibsashada codadka ee doorashada madaxtinimada maadaama ay xildhibaannadu isku dayayaan in ay soo ceshadaan kharashaadkii ka baxay iyagoo lacag ka raadinaya musharraxiinta xilka madaxtinimada.

Yareynta khidmadaha musharixiinta waxey xaqiijin kartaa in la helo baarlamaan loo dhan yahay. Tallaabada koowaad ayaa ah in la yareeyo khidmadaha diiwaangelinta ee laga qaado musharraxiinta dumarka ah iyo dhallinyarada (sida loo sameeyey musharraxiinta dumarka doorashadii 2016), taasoo yareyneysa caqabadaha ku horgudban ka qeybgalka tartanka oo ay la kulmayaan dumarka iyo dhalinyarada. Si guud, khidmadaha ama lacagaha oo la yareeyo waxa ay u oggolaaneysaa qeyb weyn oo bulshada kamid ah in ay u tartamaan kamid noqoshada hannaanka doorashada. Haddii maalgelin iyo taageero laga helo saaxiibada caalamka, tani waxaa sidoo kale yareyn kartaa lacagaha musharraxiinta laga qaado. Bulshada rayidka ah ee Soomaaliya waxaa sidoo kale lagu taageeri karaa in la siiyo tababar si ay u caawiyaan musharraxiinta qaar in ay sameeyaan abaabul dhaqaale iyo lacago lagu taageero musharraxiinta.

### *Ilaalinta Qoondada Haweenka:*

Haweenka ayaa hadda ah boqolkiiba 24 ka ah baarlamaanka, inkastoo qoondo 30 boqolkiiba ah lagu heshiiyey doorashadii 2016. Sikastaba ha ahaatee, tani ayaa loo arkey horumar weyn oo lagu gaarey olole ay haweenku hogaaminayeen oo ku saabsanaa metelaadda haweenka iyo sidoo kale taageerada caalamka. Farsamooyinka loo adeegsadey in lagu gaaro qoondadan waxaa ka mid ahaa: u qoondeynta kuraasta haweenka musharraxiinta ah iyadoo loo maraayo wadahadallo u dhexeeya beelaha; iyo sidoo kale yareynta ama dhimidda boqolkiiba 50 ee khidmadda diiwaangelinta dumarka.

Waxaa jirta halis ah in 2021, metalaadda haweenka (gaar ahaan golaha shacabka) ay hoos u dhici doonto. Ma jiraan kuraas loo gaar yeeley haweenka – taasoo ah habka keliya ee macquulka ah ee damaanad qaadaya in qoondada haweenka la helo. Odayaasha beelaha ayaa weli ku dhiirran in ay hormariyaan/taageeraan musharraxiinta ragga ah maadaama dhaqanka ah guurka qof ka baxsan reerka uu ka dhigan yahay in dumarku aan loo arkin kuwa awooda in ay si buuxda u metalaan beesha. Qaar badan oo kamid ah beelaha ay haweenku ku metalaan baarlamaanka ayaa rajeynaya in markan ay helaan rag ku metala baarlamaanka, halka xildhibaanada ragga ah ay diidan yihiin in ay kuraastooda uga haraan dumarka haddii kuraasta loo asteeyay dumar sanadkii 2016 la beddelo. Cadaadiskii sarreeyay iyo ololahii ay wadeen ururada haweenka iyo beesha caalamka doorashadii 2016 ayaa sidoo kale aad u maqan hadda.

Si loo ilaaliyo qoondada dumarka, ka go'naansho siyaasadeed ee dhammaan saamileyda doorashada ayaa loo baahnaan doonaa, gaar ahaan hoggaamiyeyaasha beelaha iyo odayaasha. Hoggaamiyeyaasha siyaasadda ee heer federal iyo heer dowlad goboleed iyo sidoo kale guddiyada doorashada waa in ay la xiriiraan beelaha ayna hormariyaan fikirka ah in loo qoondeeyo dumarka kuraas gaar ah oo kamid ah juffooyinka. Tani waxaa sidoo kale kaalin ka qaadan kara guddiyada hirgelinta doorashooyinka heer dowlad goboleed oo dib-u-eegis ku sameeyn kara liiska musharraxiinta kuraasta ee dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka islamarkaasna diidi kara haddii boqolkiiba 30 aaney ku tartameynin kuraasta haween keliya. Tani waxaa

caawin karta haddii ay guddiyada maareeya doorashada ay sidoo kale taageeraan qoondada dumarka. Saaxiibbada Soomaaliya ee caalamka ayaa sidoo kale waxay door ka ciyaari karaan iyagoo taageeradooda geedi-socodka doorashada shuruud uga dhigi kara in qoondada haweenka la xaqiijiyo.

*Doorka Bulshada Rayidka:*

Doorka bulshada rayidka si faahfaahsan looguma xusin heshiisyadii laga gaarey nooca doorashada, inkastoo heshiiskii Dhuusmareeb 3 uu muujinaayey in ay ku lug yeelan doonaan xulitaanka ergooyinka. Way adag tahay in la qeexo kaalinta ay bulshada rayidka ku yeelan karaan doorashada dadban. In wakiilo bulshada rayidka ah ay ka qeyb qaataan xulashada ergada waxaa ay noqon doontaa hannaan dhib badan. Sikastaba ha ahaatee, sare-u-qaadista habka xulashada ergooyinka iyadoo lagusoo daraayo qeyb weyn oo bulshada Soomaaliyeed kamid ah, gaar ahaan haweenka iyo dhallinyarada ayaa ah weli iskuday qiimo leh, oo laga yaabo in uu xaqiijiyo nidaam doorasho oo loo dhan yahay. Waxaa uu sidoo kale yareyn karaa baaxadda laaluushka ergada.

Fududeynta doodo u dhexeeya odayaasha, hoggaamiyeyaasha siyaasadda iyo guddiyada doorashooyinka si loo tixgeliyo waddooyin hoggaamiyeyaasha bulshada rayidka ee lagu kalsoonaan karo ay qeyb uga noqon karaan xulitaanka ergada waa tallaabo muhiim ah. Ugu yaraan, bulshada rayidka ayaa door weyn ka qaadan karta dib-u-eegista iyo turxaan bixinta liiska ergada si loo waafajiyo shuruudaha lagu heshiiyey iyo in la muujiyo khaladaadka ku jira hannaanka. Door kale oo muhiim ah oo bulshada rayidka ay leedahay waa kormeerka doorashada, oo ay kamid tahay xaqiijinta hababka codeynta ee maalinta cod-bixinta. Mar kale, tani si fiican looguma xusin heshiisyada hadda jira waxayna u baahan tahay wadahadal dheeri ah oo u dhexeeya guddiyada doorashooyinka iyo hoggaamiyeyaasha bulshada rayidka ah.

## Gunaanad:

In la ilaaliyo horumarkii horay loogu sameeyay marxaladda isbeddelka doorashada ee Soomaaliya waa in uu noqdaa mudnaanta koowaad ee hannaanka doorashooyinka soo socda. Muhiimad ahaan, Soomaalidu waxay hore heshiis uga gaareen arrimaha ugu muhiimsan ee geeddi-socodka doorashada iyadoo loo marayo wadahadal. Sidoo kale, doorashadu waxay kaloo gacan ka gaysan kartaa sii ballaarinta ka-qaybgalka iyo metelaadda siyaasadeed ee Soomaaliya, taasoo noqon doonta tallaabo kale oo horey loo qaado – in kasta oo ay yar tahay.

Guulahaan weli lama damaanad qaadin. Hannaanka doorashada ayaa kusoo aadaya dabayaaqada xilli ay ka jiraan Soomaaliya xiisado siyaasadeed oo xoogeystay ee u dhexeeya dowladda federaalka iyo qaar ka mid ah dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka, gaar ahaan Jubaland iyo Puntland, iyo sidoo kale khilaaf u dhexeeya dowladda federaalka iyo siyaasiyiinta mucaaradka. Heshiiskii la gaaray bishii Sebteember waa mid nugul, maadaama aanu kalsooni badan heysanin, arrimaha lagu muransan yahay ee kor ku xusan ayaana carqaladeyn kara hannaanka doorashada. Waxaa jirta ifafaalo ah in doorashooyinka ay noqdaan kuwo daba dheeraada, taasoo kordhinaysa suuragalnimada in natiijada doorashadu noqoto mid lagu murmo.

Natiijo lagu muransan yahay ee doorashada heer madaxweyne waxay horseedi kartaa isku-dhac gacan ka hadal ah, gaar ahaan haddii kala qeybsanaanta ay horseeddo kala qeybsanaan ku timaadda ciidamada amniga. Xitaa xaalad kasii khatar badan ayaa ah in geedi-socodyo is barbar socda ay soo ifbaxaan, ama saamiley muhiim ah ay qaadacaan hannaanka. Marka lagasoo tago halista khilaafka, waxaa sidoo kale jira sii yaraanshaha kamid ahaanshaha hannaanka, gaar ahaan marka ay timaado metelaadda haweenka.

Kuwani waa xaaladaha ugu xun ee dhici kara waana kuwo laga fogaan karo haddii dareenka adag ee heshiiskii la gaarey bishii Sebteambar ee u dhexeeyey hoggaamiyaasha siyaasadda ee Soomaaliya dib loosoo nooleyn karo lanasii ballaarin karo. Wadahadal siyaasadeed oo joogta ah oo u dhexeeya madaxda Soomaalida ee ka kala socda dhinacyada kala duwan ee arrimaha halkan lagu xusey ayaa lagama maarmaan u ah dhismaha kalsooni, xiriiro iyo wadiiqooyin isgaarsiineed oo gundhig u noqon kara hannaan lagu kalsoonaan karo, iyo dhexdhexaadinta khilaafaadka iyo kala duwanaanshaha siyaasadeed. Tani waxa ay u dhici kartaa qaab kulan

bille ah oo u dhexeeya hoggaamiyaasha siyaasadda inta ololaha doorashada uu socdo, iyo sidoo kale shirar caadiga ah ee u dhexeeya lataliyeyaasha farsamada ee siyaasiyiinta kala duwan.

Saaxiibbada Soomaaliya ee caalamka ayaa sidoo kale door ka ciyaari kara iyagoo dhiirrigelinaya ka go'naanshaha heshiisyadii la gaarey bishii Sebteembar iyo Oktoobar ayna taageeraan wadahadallada lagu xallinayo arrimaha la isku hayo. Hoggaamiyeyaasha Soomaalida ayaa arrintan si dhab ah u qaadan doono maadaama geeddi-socod kasta oo lagu kalsoonaan karo uu u baahan yahay maalgelin iyo aqoonsi caalami ah.


www.riftvalley.net

## Xuquuqda

Warbixintaan kooban waxaa soo wada saaray Somali Dialogue Platform iyo Somali Public Agenda.

Somali Dialogue Platform waa barnaamij Soomaalida ka taageera sidii loo gaari lahaa is afgarad ku saabsan arrimaha la isku haysto ee siyaasadeed waxaana fuliya Machadka Rift Valley. Somali Dialogue Platform waxaa maalgeliya Foreign, Commonwealth and Development Office (FCDO) ee Boqortooyada Ingiriiska, Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Denmark, iyo Hay'adda Mareykanka u Qaabilsan Horumarinta Caalamiga (USAID), oo usoo marsiisa mashruuca Bringing Unity, Legitimacy, and Democracy (BUILD) (oo ay hirgaliso Creative Associates International Inc.). Aragtiyada faallada kama turjumayaan siyaasadaha rasmiga ah ee Dowlada UK, Dowlada Denmark ama Dowlada Mareykanka. Platform-ku wuxuu leeyahay madaxbannaanida tifaftirka warbixinnaddiisa oo dhan.

Somali Public Agenda (SPA) waa hay 'ad aan macaash-doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan. Somali Public Agenda waxa uu wadashaqeyn la leeyahay Somali Dialogue Platform.

MachadkaRift Valley wuxuu ka shaqeeyaa bariga iyo bartamaha Afrika si uu usoo saaro aqoon maxalli ah oo loo adeegsan karo horumarinta arrimaha bulshada, siyaasadda iyo dhaqaalaha.



Xuquuqda daabacaadda© Machadka Rift Valley 2020. Warbixintan waxaa la daabacay iyadoo la adeegsanayo Creative Commons Attribution-NonCommercial-NoDerivatives License (CC BY-NC- ND 4.0).